

# Tallaalka iyo Badqabka COVID-19: Fahamka Faa'idooyinka iyo Halisaha



## Tallaalka Johnson & Johnson: Faa'idooyinka iyo halista

### ✔ Faa'idooyinka

- Tallaalka halka garoojo
- Aad ayuu ugu wanaagsanyahay ka illaalinta isbitaal jifinta iyo u dhimashada COVID-19
- Wuxuu ka illaaliyaa howlgabka kelyaha, howlgabka wadnaha, cudurka sambabka, xinjirowga iyo saameynada kale muddada dheer ee COVID-19
- Iqtiyaarka dadka alaarjiga ku ah tallaalkada mRNA oo aanan heli karin garoojada labaad ee taxanaha mRNA

### ⚠ Halista

- Halista hooseyso ee ku dhacitaanka nooca cudurka xinjirowga. Waxay ku dhacday qiyaastii 3 marka laga saaro milyan walboo dad ah ee la tallaalay.
- Halista waxay ku sareysaa **dumarka da'aha 18-49: 8.8 ee 1 milyan ee walba ee kooxda da'daan**

### Qaababka looga fakaro halistaan

Halista xinjirowga ee Johnson & Johnson

3 qof halkii milyanba

Halista xinjirowga ee COVID-19

in dhaafsan 2500x ka badan

**Baaritaano adag kadib, taqasusyada badqabka ayaa go'aansanayo faa'idada tallaalka inay ka badantahay halista aadka dhifka u ah.**

## Waxaan qaatay tallaalka Johnson & Johnson. Miyaan xinjiroobayaa?

Xasuuso, halistaada aad ayay u hooseysaa. Sadexda isbuuc kadib cirbadaada, la hadal bixiyaha daryeelkaaga caafimaad haddii aad qabtid:

- Madax xanuun cusub (aad uga daran midkaaga caadiga ah)
- Xabad xanuun iyo cadaadis
- Neefsiga oo yaraada
- Dhabar xanuun cusub ama xun
- Xundhur xanuunka
- Maruub cusub
- Baraha yar ee gaduudan ama baroonka ah ee gacmaha iyo garka



Bixiyaha daryeelkaaga caafimaad ayaa kuu sheegi karo inaad raadisid daaweyn degdeg ah.

## Saameynada caafimaadka dhifka ah: Dhammaan tallaalkada

- Falcelinada alaarjiga daran ama alaarjiga xun, neefsiga adkaado, dhuun barar, waa saameynta dhifka ah ee dhammaan tallaalkada COVID-19. Waxaa lagu kormeerayaa 15-30 daqiiqo kadib tallaalkada, si markaas bixiyayaasha tallaalka u hubiyaan inaad wanaag dareemaysid.
- Ka hor intaadan helin cirbadaada, u sheeg bixiyahaaga tallaalka haddii aad alarji ku tahay cunto walba ama daawooyin.
- Inta lagu jiro nidaamka wargelinta badqabka, waan ognahay in dhacdada wadanka oo dhan inay tahay qiyaastii 2-5 oo halkii milyan ah ee tallaalkada Pfizer iyo Moderna. Gudaha Oregon, sida ku saleysan xogta isbitaal geynta, waxay ku dhacdaa 10 oo milyan walba. Kama hayno xog weli Johnson & Johnson.



**Helitaanka dokumintiga:** Wixii shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, daabacaada ballaaran, ama farta indhooleyaasha. Kala xiriiir Xarunta Macluumaadka Caafimaadka 1-971-673-2411, 711 TTY ama [COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us](mailto:COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us).

OHA 3722 (5/13/2021) SOMALI